

Milicsiga guud ee Warbixinta Sannadlaha 2009 ee Guddida Maraykanka u qaabilsan Xorriyadda Diimaha Caalamiga ah

Guddida Maraykanka u qaabilsan Xorriyadda Diimaha Caalamiga oo loo soo gaabsado (USCIRF ama Guddida) waa guddi dawladada Maraykanku leedahay, laba-xisbi ah, madax bananaan oo lagu abuuray Xeerki 1998 ee Xorriyadda Diimaha Caalamiga ah (IRFA), waxaanay guddidani kormeertaa xadgudubyada xuquuqda xorriyadda diimaha ama caqiidada ee dibadda, sida lagu qeexay Baaqa Caalamiga ah ee Xuquuqul Insaanka iyo qalabyadda kale ee caalamiga ah, waxaanay talooyin siyaasadeed oo madaxbaan ka siisaa arimahan Madaxwaynaha, Xog-haya Arimaha Dibadda, iyo aqalka Koongareeska.

Guddidu waxay ka kooban tahay 10 xubnood, waanay ka madax banana tahay Wasaaradda Arimaha Dibada Maraykanka. Saddex xubnood oo Guddida ah waxaa soo magacaabaya Madaxwaynaha lixna waxaa soo magacaabaya hogaanka Koongareeska. Danjiraha-wareega ee Xorriyadda Diimaha Caalamiga ah, oo ah jaggo Wasaaradda Arimaha Dibadda waxaa sidoo kale abuurtay IRFA, waxaanay tahay xubin aan cod lahayn oo Guddida ka mid ah.

Xubnahan Guddidu waxay arrimaha dibadda, xuquuqda aadamaha, xorriyadda diimaha, iyo sharciga caalamiga ah ku soo kordhiyaan waayo aragnimo iyo khibrad badan. Intii lagu gudo jiray tobankii sanno ee ay jirtay Guddidu, xubnaha Guddida waxaa ka mid ahaa Wadaad Kaatoolig ah, Imaam Muslim ah, U doode xuquuqul Insaanka oo Yuhuudi ah iyo wadaad, Wadaad Borootastan ah, iyo khabaro kale oo sharciga, iyo siyaasadda arimaha dibada ah oo ka soo kala jeeda qoomiyaddo kala duwan sida Kiristaan Oortodhokis ah, Mormon, Hinduu, Budhiiste, iyo Bahaay. Guddida iyo hogaankoodu waxay tabashooyin ka soo kiciyeen xadgudubka xorriyadda diimaha ee saamaynaya arrimo, waddamo, iyo caqiidooyin kala duwan. Tusaale ahaan, Guddida waxay shaqaynayeen iyagoo matalaya Budhiiska Burma, Hinduuga Bangladesh, Muslimiinta Shiicadda aha Sucuudi Carabiya, Yuhuuda Venezuela, Axmadiyiinta Pakistan, Muslimiinta Ughuur ee China, Kiristaanka Suudaan, iyo Bahaayda Iran.

Warbixinta sannadlaha ahi waxay sharaxaysaa xaaladda xorriyadda diimuhu ama caqiidooyinku ee waddamada guddidu danaynayso waxaanay ka bixiyaan talooyin siyaasadeed si loo hubsado in kor u qaadista xorriyadda diimuhu ama caqiidooyinku u noqoto qayb muhiim ah oo ka mid ah siyaasada arrimaha dibadda ee Maraykanka. Warbixinta sanadlaha ahi waxay ka kooban tahay cutubyo waddamada Guddidu ay kula talisay Xog-hayaha Arimaha Dibada ee ay ku magacowday “Wadamada sida gaarka ah loo danaynayo (Countries of Particular Concern)” (CPCs) ee IRFA fiirinayso xadgudubyada daran ee ay ku hayaan xorriyadda diimaha; waddamada Guddidu ku dartay Liiska Isha Lagu Hayo (Watch List) ee ku xadgudubaya xorriyadda diimaha balse aan buuxin shuruudaha CPC balse u baahan dareen; iyo waddamada kale ee Guddidu si dhow isha ugu hayso. Warbixinta buuxda waxaa laga heli karaa www.uscirf.gov.

Warbixinta Sannadlaha ah ee 2009 waxay ka hadlaysa muddadii May 2008 ilaa April 2009.

Wadamada Sida Gaarka loo Danaynayo iyo Liiska Isha Lagu Hayo.

. IRFA waxay Xog-haya Arrimaha Dibada, oo uu wakiishay Madaxwaynuhu, ku hagtaa magacaabista “Wadamada sida gaarka ah loo danaynayo” ama CPC, ee ah waddamada dawladahoodu ay sameeyeen ama u dul qaateen xadgudubyo xorriyada diimaha ah oo “si gaar ah u daran”. IRFA waxay ku qeexaysaa wadamada xadgudubyada “si gaar ah u daran” xadgudubyada “abaabulan, joogtadda ah, ee waawayn,” waxaa ka mid ah ficilada sida jidh-dilka, xadhiga muddada dheer ee aan xukunka lahayn, waayista, ama “diidista kale ee cadaanka ee xuquuqda nololsha, xorriyada, ama amniga dadka kale.” Marka wadan loo aqoonsado in yahay CPS, madaxwaynaha waxaa sharciyan laga rabaa inuu ka horyimaad xadgudubyadaa isagoo qaadaya talaabooyinka ay cayintay IRFA.

..
Jeenawari 2009-kii, Wasaarada Arimaha Dibadu waxay dib CPC ugu magacowday isla sideedii waddan ay markii u dambaysay CPC u magacowday Noofambar 2006: Burma, the Democratic People’s Republic of Korea (Waqooyiga Korea), Eritrea, Iran, the People’s Republic of China, Saudi Arabia, Sudan, iyo Uzbekistan. Wasaarada Arimaha Dibadu waxay soo saartay sharci 180 maalmood ah oo la qaadayo talaabo kasta oo ka dhan ah Uzbekistan, iyo sharci sharci aan waqti lahayn oo ka dhan ah Saudi Arabia, labadda kiisba si “hore loogu waddo ujeedada Xeerka (Xorriyadda Diimaha Caalamiga).” Sharcigan awgii, Maraykanka siyaasad ahaan ka jawaabi maayo xadgudubyada daran ee Xorriyada Diimaha ee labadan wadan.

Warbixinta xilligan, guddidu waxay ku talisay in Xog-hayaha arrimaha dibaddu u magacaabo CPC 13-kan waddan: Burma, the Democratic People’s Republic of Korea (Waqooyiga Korea), Eritrea, Iran, Iraq,¹ Nigeria,² Pakistan, the People’s Republic of China, Saudi Arabia, Sudan, Turkmenistan, Uzbekistan, iyo Vietnam.

. Guddidu sidoo kale waxay wadamo u magacowdaa Liiska Isha lagu Hayo (Watch List), taas oo ku salaysan baahida loo qabo in si dhow loo kormeero xadgudubyada xorriyadda diimaha ay sameeyeen ama u dulqaateen dawlada wadamadan aan buuxin shuruudihii CPC. Wadamadan waxaa loo fiiriyaa si dhwo, xaaladaha qaarna, waxaa talaabo diblomaasiyadeed la beegsata Wasaaradda Arimaha Dibadda iyo ururo kale oo dhinacyo badan ah. Liiska Guddida ee Isha Lagu Haynayo ee xili warbixineedkan waxaa ka mid ah Afghanistan, Belarus, Cuba, Egypt, Indonesia, Laos, Russia, Somalia, Tajikistan, Turkey, iyo Venezuela.

Danaynta Guddida ee Soomaaliya

Soomaaliya may lahayn dawlad dhexe oo shaqaynaysa tan iyo 1991-kii. Maqnaanshihii sharciga iyo kala dambaynta, xorriyadda diinta ama caqiidadu, sida xuquuqihii kale ee aadmiga, waxaa xanibay kooxaha kacdoonka wadda, qab-qablahaashii dagaalka, sarkiil is magacowday, masuuliyiinta maxalliga ah iyo aragtida mujtamaca ee markaa taagnayd. Inkastoo Soomaalidu waligeed ay ku dhaqamsay nooc Islaam ah oo Suufiyaddu ku xoog badan tahay,

¹ Markii ay ku soo biirayeen warbixinta Guddida ee Iraq, xubnaha guddida ee Cromartie, Eid, Land, iyo Leo ayaa khilaafay talooyinkii CPC, waxaanay ku soo gabogabeeyeen in Iraq baaqi ku sii ahaato Liiska Isha lagu Haynayo ee Guddida.

² Xubin Cromartie ayaa khilaafay taladii CPC, taas oo lagu soo gabogabeeyay in Nigeria baaqi ku sii ahaato Liiska Isha lagu Haynayo ee Guddida.

ayaa haddana waxaa soo baxay qolyo xagjir ah. Sannadkii 2008, Al-shabaab (oo ah kalmad carabiya macnaheeduna yahay dhalinyaro) ayaa xukunkooda ku fidiyay qaybo ka mid ah badhtamaha iyo koonfurta wadanka, waxay dileen dadkii diimaha kale haystay, waxay khasab ku fuliyeen mabda'ad-adag oo islaami ah oo u eg kii daalibaan, waxaanay cadaadiyeen dhaqanada ay u arkaan inaysan islaam ku lug lahayn. Al-shabaab waxay xidhiidh la leedahay Al-Qaacida waxaana Maraykanku si rasmiya ugu aqoonsaday urur argagaxiso ajaanib ah. Warbixntaha dadka kiristaanka ah iyo kuwa muslimimadii ka baxay ee la dilay wadanka oo dhan aad ayay sare ugu kacday. Guddidu wuxuu soomaaliya ku daray liiskeeda wadamada ay isha ku hayso (Watch List) xuquuqda xorriyadda diimaha ee sii xumaanaya iyo awood darrida Dawlada Federaalka ee Ku Meelgaadhka ah (TFG) ee inay yarayso gabood-faladan oo ay dhowrto xorriyadda diimaha. Guddidu waxay sii waddi doontaa inay kormeerto Xorriyadda Diinta ee Soomaaliya si ay go'aan uga gaadho bal xaaladaha Soomaliya ka jiraa ay ka dhigi karaan mid laga dhigo wadan si gaar ah loo danaynayo.

Kadib markii kali taliyihii Siyaad Bare Xukunka ka dagay Jeenawari 1991, dagaalo u dhexeeya qabiilooyinka iyo kuwo u dhaxeeya kooxaha ayaa keenay dhibaato bani-aadan oo badan. Soo galistii QM iyo Maraykanku waxay bilaabantay 1992 waxaanay dhamaatay 1994. Dedaalo caalami ah oo soo noqnoqday iskuna xigxigay oo la doonayay in lagu dajiyo Soomaaliya ayaa guul daraystay, iyadoo qabiilooyinka iyo gobolada deriska ahi ay ku tartameen is muquunin. Waqooyiga, laba dawlad goboleed ayaa ka soo baxay: Puntland iyo jamhuuriyada is-magacowday ee Somaliland, tan dambe waxay ku salaysan tahay Maxmiyaddii hore ee Ingiriiska. In kastoo ay jirtay ilaa 1991, Jamhuuriyadda Somaliland waxay ku guul daraysatay inay u hesho aqoonsi caalami ah madax banaanideeda. Puntland, iyadoo uu maamulo nin awood badan oo maxali ahi, waxay sheegatay is maamul goboleed ku salaysan mala-awaalka nidaamka federaalka ah ee mustaqbalka Soomaliya noqon doonto.

Soomaaliya malaha distoor caalmku aqoonsan yahay iyo sharci ilaalinaya xorriyada diimaha iyo xuquuqaha kale ee aadamaha. TFG waxay meel marisay Axdi Qarameed Ku Meelgaadha ah kaas oo sheegaya in diinta wadanku tahay Islaam. Maamulada ka jira Somaliland iyo Puntladda waxay Diinta Islaamka dhigeen diinta rasmiga ah ee goboladooda. Garsoorku, baddi goboladda, wuxuu ku tiirsan yahay nooc isku dar ah oo ah sheeracada, iyo sharciyada dhaqanka iyo soo jireenka ahaa iyo sidoo kale beenal koodhkii ka horeeyay 1991. Dawlad dhawaan la doortay ayaa hirgelin doonta nooc cusub shareeco ah; madaxwaynaha cusubi wuxuu sheegay inuu ixtiraami doono xuquuqal iinsaanka iyo xuquuqda haweenka.

Guuldaraddii TFG, tii la sameeyay 2004, si ay u soo celiso sharciga iyo kala dambaynta oo ay fidiso adeegyaddii dawladeed waxay keentay jawi musuqmaasuq iyo sharci la'aaneed, waxaanay u ogolaatay qab-qablaysashii dagaalka inay qabsadaan deegaanada maxalliga ah. Iyadoo raadinaya inay meesha ka saaraan qab-qablaysasha dagaal oo ay dib u abuuraan sharciga iyo kala dambaynta iyadoo adeegsanaya shareecadda maxkamadaha, Ururka Maxaakiimta

Islaamiga ah (UIC) ayaa soo baxay 2006. UIC waxay ahayd xulufo aan si adag isku xidhnayn oo ka kooban Muslimiin qunyar socod ah iyo kuwo xag jir ah, xaakino maxkamadaha sharciga ah, iyo ganacsato. Iyadoo ay taageerayaan dadka degaanku, kooxo maleeshiyaad ah oo ku taxan UIC waxay caasimada Muqdisho ka qabsadeen qab-qablaayaashii dagaalka Juun 2006 taas oo gu'giina, dhaqdhaqaaqaasi awood milatari ka sameeyay inta badan badhtamaha iyo koonfurta Soomaaliya oo ay bilaabeen inay u cago-jugleeyaan TFG oo saldhigeedu ahaa Baydhabo.

Si kastaba ha ahaatee, UIC waxay si dhakhso ah u saameeyay canaasiirtii xagjirka ahayd ee raadinayay inay soo rogaan nooc islaam ah oo xagjir ah una eg kii daalibaantii Afghanistan. Mid ka mid ah kuwa ugu xag-jirsan, Al-shabaab weeyaan'e, ayaa waxay noqotay garabka maleeshiyo oo aad muhim u ah oo UIC ah. Meelashiyaddu si fiican ayay u hubaysnaayeen, si fiican ayay u tabo-barnaayeen, waxaana hogaaminayay Adan Xaashi Cayrow, oo ka soo dagaalamay Afghanistan waxaanu xidhiidh la lahaa Al-Qaeda. Cayrow wuxuu la shaqeeyay Xasan Daahir Aways, oo kii ugu xag-jirsanaa hogaanka UIC isla markaana Maraykayku ku tuhunsanaa argagixiso.

Dawladdaha Maraykanka iyo Itoobiya waxay fiirinayeen UIC-da sii xoogaysanaysa ee xag-jirka sii noqonaysa iyadoo ka qayliyey, khaasatan xidhiidhka lagu tuhunsanaa inay la leeyihiin al-Qaeda. Diisambar 2006, TFG iyo ciidan Itoobiya ayaa ka hortag sameeyay. Xoogagan is kaashanayaa waxay markiiba waajaheen UIC, iyadoo qabsaday Muqdisho iyo in badan oo koonfurta ka mid ah. Dawlada Maraykanku waxay siisay taageero diblomaasiyadeed iyo mid sir-doon waxaanay isticmaaleen duqayn maraykanku cirka ka soo sameeyay kuwaas oo lala beegsaday xubnaha xubnaha al-Qaeda ka tirsan ee la sheegay inay ku jiraan xoogaga UIC ee sii jeeda dhinaca xuduudka Kenya. Weerarkan iyo taageerada Itoobiya ayay dad badan oo Soomali ahi u qaateen in qabshada Itoobiya ee Soomaliya uu ka dambeeyo Maraykanku oo ay qayb ka tahay dagaalka caalamiga ah ee uu kula jiro argagaxisada.

Kadib jabintii, UIC waxay u kala jabtay dhowr kooxood. Qaar ka mid ah kuwii ugu xag-jirsanaa oo ay ka mid ahaayeen al-shabaab, ayaa dib isku bahaystay si ay u sii wadaan kacdoonka ka dhanka ah TFG oo ay ka hor yimaadaan joogista Itoobiya ee Soomaliya. Intii lagu gudo jiray 2007 ilaa 2008, al-Shabab waxay soo hoysay guulo milatari, iyadoo xukunka dakado iyo magaalooyin muhim ah oo ka mid ah badhtamaha iyo koonfurta Soomaaliya ah la wareegay. Dhamaadkii 2008, al-Shabaab waxay qabsatay Baydhaba inkasta oo aanay qabsan Muqdisho. Dhamaadkii Jeenawari 2009, al-Shabaab iyo maleeshiyo kale ayaa ku guulaystay in Itoobiya ku khasbaan inay ciidamadeed kala baxdo wadanka, iyadoo kaga tagay xoogaga nabad ilaalinta Midowga Afrika oo aan badnayn.

Siddii UIC samaysay, al-Shabaab iyo kooxo kale oo Islaamiyiin kacdoona wadda ah ayaa sumcad yeeshay waxaanay keeneen sharci iyo kala dambayn, iyadoo ka adkaaday Itoobiyaankii, wax ka qabtay musuqmaasuqii, baa'biyey kaantarooladii sharci darrada ahaa oo keenay xoogaa

taageero bani-aadminimo. Dagaal yahanada al-shabab waxay waxay galeen magaalooyinkii, waxay soo rogeen shareecadii waxaanay xaliyeen muranadii iyagoo maxkamad wareegta ku xukumay dambiilayaashii.

Intii lagu gudo jiray 2008, al-shabab waxay joojisay dhaqanadii aan Islaamiga ahayn si ay mujtamaca Soomaalida uga nadiifiso qalbiyada dhaqan xumadda. Maleeshiyadu waxay xidheen Sinimoooyada, waxay dab qabadsiiyeen suuqyada lagu gadayay *qaadka* (geed dhalad ah oo la calaliyo si loogu mirqaamo), waxay madaxa ka xiireen raggii sida aan haboonayn u xiirtay, waxay madnuuceen nooc kasta oo sigaar cabis ah, waxay madnuuceen muusikaddii.

Al-Shababa waxay fulisay rabshado diin ku salaysan, April 2008, koox maleeshiyo ah oo ku taxan al-Shabaab ayaa dilay afar macalin oo Kiristaan ah kuwaas oo laba ka mid ahi ahaayeen Soomaali ka baxday Islaamnimada. Oktoobar 2008, gabadh yar oo 15 jir ah oo magaalo joogta oo kooxdu soo qabatay ayaa dhagax ku dileen 50 nin 1,000 qof hortooda. Dambiga inanta yari samasay wuxuu ahaa inay saddex nin kufsadeen. Jeenawari 2009, kooxaha kacdoonka wadda ee Islaamiyiinta ah ayaa dilay siyaasi Soomali ah maxaa yeelay wuxuu xidhiidh la lahaa dawlada Itoobiya kadib markii lagu soo oogay dacwad been abuur oo ah inuu “ridoobay”.

Noocan Islaamka ah ee ad-adag ee ay al-Shabaab wadato wuu ku cusub yahay bulshada Soomaaliyeed ooh ore ugu dhaqmi jiray Islaam qunyar socod ah oo Suufiyaddu saamayn wayn ku lahayd. Sida xaqiiqda ah qolyaha qunyar socodka ah ee ka tirsan bulshada Soomaaliyeed waxay ka hadleen qaar ka mid ah ujeedooyinka iyo taaktikooyinka kooxaha muqaawamada Islaamiyiinta ah, sida isticmaalida dadka is qarxiya, taas oo mujtamaca Soomaaliyeed u cuntami wayday. Febraayo 2009, koox muwaadiniin ah oo ah wadaado qunyar socod ah, iyo Islaamiyiin isku magacaabay *Ahlu Sunna wa Jamma* (oo sida muuqata ah weedh carabi ah oo macnaheedu yahay – Dadka raacay sunihii Nabiga (NNKH) iyo Asxaabtii) ayaa isku yimid si ay ula dagaalamaan maleeshiyada al-Shabab. Kooxdani xooga guul ah ayay ka gaadheen in al-Shabaab ka kaxeeyaan magaalooyinka qaar oo ay la sii dagaalamaan kooxdan xagjirka ah. Sidaas oo ay tahay, al-Shabaab waxay sii waday inay kaantaroosho qaybo baaladhan oo ka mid ah wadanka oo ay weeraro ku qaadan ciidamada Midowga Afirka (AU), waxaanu lagu eedeeyaa dilalka saraakiisha xulafada la ah TFG.

Marka laga yimaad guulaha Milatari ee ay gaadheen, al-Shabaab waxay kordhisay dadkii kuu soo biiryay iyadoo ka faa’iidaysanaysa cadaawada dadka ee ka dhanka joogitaanka ciidamada Itoobiya ee Soomaaliya iyo isticmaalkeeda aanay u aabo-yeelayn adeegsiga xooga iyo xadgudubyada xuquuq aadamaha iyo iyagoo ku baaqaya midnimo Islaamnimo ee ka dhaxaysa ee ay wadaagaan Soomaali badani. Kooxdan maleeshiyadda ahi waxay Itoobiya ugu sawireen dadka inay wadan soo duulay oo sii wadda cadaawaddii taraakhiga ahayd ee ku faafinta Kiristaanka geeska afrika. Sida lagu soo waramayo, al-Shabaab waxay soo jiidatay dhalinyarta bilaa shaqadda ah iyadoo lacag siisa kuwa cusub ee ay qaadato, waxay tabobartay ardayda masaajidada kutubka ka raacda, waxaanay isticmaashay CD-yo iyo noocyada kale ee ah warbaahinta elektarooniga ah si ay shaaciso shahaadnimada.. Xataa kuwa aan ansixin Islaamnimada xag-jirka ah al-Shabaab ama xeeladaha milatari ee birta ah waxay siiyeen

taageero niyadeed madaama ay rumaysnaayeen in kooxdu ku saxan tahay hawl-galkeeda ka dhanka ah ciidamada Itoobiyaanka.

Al-Shabaab waxay sidoo kale ku guulaysatay inay dad ka qoroto caalamka oo dhan, oo Maraykanku ku jiro. Daraasiin dhalinyaro Soomaaliyeed oo ku nool Ameerika ayaa ka barbar dagaalamay al-Shabaab Soomaaliya; nin dhalinyar ah oo reer Minnesota ah ayaa la ogaaday inuu weeraraddi qaybta waqooyi ee wadanka ee Oktoobar 2008 uu fuliyay. Sida laga soo xigtay saraakiisha FBI-da, dareen wadaniyeed, maaha jihad, ayaa la rumaysan yahay inay sababta rag badan ugu biirayo al-Shabab. Iyaddoo aanay jirin cadayn ah inay qorshaynayaan weeraro ay Maraykanka ku soo qaadaan, haddana dawlada Maraykanku si dhow ayay ula socotaa dedaalkan ay dadka ku qoranayaan. Shaqsiyaad sidoo kale oo ka yimi Yurub iyo meelo kale oo Afrika ayaa sidoo kale Soomaaliya ku sugan si ay tabobarna u siiyaan dagaalkana ugala qayb-galaan al-Shabaab.

Waxaa la wada og yahay inuu jiro xidhiidh ka dhaxeeya al-Qaacida iyo al-Shabaab, xidhiidhkaas oo ay ka mid tahay al-Qaacida oo tabobar, maaliyad iyo hub siinaysa al-Shabaabtaas oo loo sii marinayo Eratariya; inta xidhiidkani le'eeg yahay lama yaqaan. Imika ma jirto cadayn ah in al-Qaada ay istimaalayso meelaha ay al-Shabaab haystaan si ay weeraro ugu soo qaado wadamada reer Galbeedka. Waxaa la ogyahay in hogaanka al-Shabaab ay xidhiidh la leeyihiin hogaamiyayaasha al-Qaacida ee ku sugan Meelaha Qabiilooyinka ee Pakistan Federaal ahaan Maamusho (FATA), iyo sidoo kale kuwii masuulka ka ahaa qarxayaddii 1998 ee safaaradaha Maraykanka Kenya iyo Tanzania. Al-Qaacida waxay soo saartay dhowr bayaan oo ay si toos ah ugu taageerayso al-Shabaab; fiidiyow ahaa Febraayo 2008, Ayman al-Zawahiri ayaa sheegay in guushii al-Shabaab ee Soomaaliya ahayd – talaabo loo qaaday wadada guusha Islaamka. Marka laga yimaad ogaansho la'aanta qotodada xidhiidhka ay la leedahay al-Qaacida, al-Shabaab wali waa halis.

Kadib bixistii ciidamada Itoobiyaanka, ee Jeenawari iyo Feebarwari 2009, TFG waxay dooratay madaxwayne , raysal wasaare iyo baarlamaan cusub waxaanay Feebarwari 2009 ka guureen saldhigoodii ahaa Djibouti iyagoo u guuray Muqdisho. Madaxawaynaha cusub ee Soomaaliya, Sheekh Shariif, wuxuu ahaan jiray hogaamiyihii hore ee garabka qunyar socodka ah ee UIC. Taa jawaabteeda, al-Shabaab ujeedada ay xustay waa inay ka hor timaad TFG oo ay Soomaaliya ka dhigto Dawlad Islaami ah halkaas oo ku dhaqanka shareecada islaamka wadankoo dhan lagaga dhaqmo. Febraayo 2009, Madaxwayne shariif wuxuu sheegay in shareecadu noqon doonto asalka sharciga Soomaaliya; talaabadan waxaa markii dambe ansixiyey Baarlamaanka Soomaaliya. Si kastaba ha ahaatee lama yaqaan sida shareecaddu Soomaaliya u ekaan doonto marka lagu dhaqmo, Madaxwayne Sharif wuxuu sheegay in shareecada Soomaaliy dhowri doonto xuquuqda aadamaha iyo xuquuqda haweenka. Khubaradu waxay aaminsan yihiin in abuurista dawlada cusub oo haysata taageerada

dadwaynaha, ka saarista ciidamada Itoobiya iyo ballanka madaxwaynaha cusub ee abuurista ee hirgelinta shareecadu ay yareeyaan taageerada maleeshiyada. Warbixinuhu waxay sheegayaan in Soomaalidu dagaal ka daaleen iyo in taageerada shacabka ee al-Shabaab hoos u dhacday.

Waxaa korodhka xagjirnimada Islaamka Soomaaliya soo raaca, weerarada lagu hayo bulshada kiristaanka tirada yar ee wadanka. Bulshaddan meeqaankeedu aad buu u hooseeya macluumaadka dadka aan muslinka ahayn ee Soomaaliyana aad buu u kooban yahay. Kiristaanka Soomaalidu waxaa u tixgaliysaa tuhun maxaa yeelay waxay ku aqoonsan jireen Cadowga Itoobiya iyo sidoo kale gumaystayaashii Ingiriiska iyo Talyaaniga. Inta yar ee Kiristaanka ah ee ku hadhay waxay ku dhex cibaadaystaan kiniisado guriga ku yaal.

Waxaa sidoo kale la weeraray Muslimiinta Kiristaan noqotay. Inkastoo ka bixista diintu aanu sharci darro ka ahayn Soomaaliya, bulsho ahaan lama aqbalayo. Muslimiinta xag-jirka ahi waxay dileen lix qof oo kiristaan noqday 2008-dii. Kadib markii mid ka baxay diinta, kiniisad ayaa la burburiyay kiristaankii ku cibaadaysanayna waa la weeraray. Kiinisadan waxaa mar hore la weeraray 2007-kii.

Xubnaha dhaqdhaqaaq Tabliqiyiinta (oo ah dacaayiin Muslimiin ah oo caalami) ayaa sidoo kale la weeraray. Meey 2008, ciidamada Itoobiya ayaa xidhay shan iyo toban ka mid ah xubnaha dhaqdhaqaaqan dhowr saacadood, oo, sida lagu soo xiganayo Wasaaradda Arimaha Dibada, sagaal wadaad oo ku taxan dhaqdhaqaaqan ayaa lagu dilay maasajid muqdisho ku yaal waxaana dilay ciidamada Itoobiya.

Talooyinka ku aadan siyaasada Maraykanka

Guddidu waxay ku soo gabogabaysay in Dawladda Federaalka ee Ku meelgaadhka ahi ay Soomaaliya siiinayso fursad ay wax kaga qabata amniga, maamulka, xuquuqul iinsaanka, iyo baahiyaha aadminimo oo ay qaadaan talaabooyin lagu xadiddayo korodhka xagjirnimada rabshada wadata. Dawlada Maraykaniy waa inay la shaqaysaa beesha caalamka si loo taageero TFG madaama ay hore ugu sii socoto inay ka hadasho baahiyaha wadanka iyo muwaadiniinta.

Guddidu waxay ku talinaysaa in dawlada Maraykanku ay:

I. Wax ka qabashada xaalada amniga ee sii socota

- la shaqayso beesha caalamka iyo Dawlada Federaalka Ku Meelgaadhka ah si nabad iyo xasilooni loogu soo celiyo Soomaaliya, taas oo ay ka mid xaqiijinta in hawlaha nabad-ilaalintu ay haystaan shaqaale ku filan; in eeshiyada hubka laga dhigo, abaabulka laga saaro, oo dib dhaqan celin loogu sameeyo; sirtoonka Soomaaliya, milatariga, iyo saraakiisha booliisku ma sameeyaan gaboodfalo xuquuqal insaanka ka dhan ah waxaanay si fiican u yaqaaniin baaqa xuquuqda aadamiga ee caalamiga ah, iyo in gabood falad

xuquuqul insaanka loo dulqaadan oo lala xisaabto dambiilayaasha.

II. Samaynta Qaab-dhismeed dawladeed oo guulaysta

- la shaqayso beesha caalamka iyo Dawlada Federaalka Ku Meelgaadhka ah , iyo Wakiilka gaarka ah xog-hayaha arimaha dibadda ee QM u qaabilsan Soomaaliya si
1) loo sameeyo qaab-dhismeed maamul iyo hay'addo waxtar leh si wax looga qabto baahiyaha shacabka Soomaaliyee 2) la xaqiijiyo in saraakiisha dawlada iyo nidaamka sharcigu inay ixtiraamayaan xuquuqal iinsaanka, oo ay ka mid tahay xuquuqda xorriyada diinta ama caqiidadu iyo 3) in kor loo qaado dib u heshiisiinta hogaamiyayaasha siyaasada dhexdooda iyo Shacabka Soomaaliyeed si looga hortago in kooxaysi curyaami hawsha dawlada ku meelgaadhka ah.

III. Xaqiijinta ku lug-lahaansho heer sare ah oo joogto oo Maraykanku ku yeesho Soomaaliya.

- Xaqiijisaa in Soomaaliya ay dareenka heerka ugu sareeya ee dawlada iyo ku lug-yeelasho Maraykanka ah oo joogto ah, taas oo ay ka mid noqon karto magacaabista Ergey Gaar ah, si wax looga qabto amniga, argagixisada, maamulka, xuquuqal iinsaanka, iyo arimaha budhacad badeeda, iyo sidoo kale la shaqaynta wadamada gobolka si looga hadlo dhinaca gobolka ee mushkilada; iyo

IV. Hagaajinta xuquuqda diinta iyo xuquuqal iinsaanka kale

- ensure that the protection of religious freedom and related human rights are addressed in Somalia, including by funding indigenous civil society organizations that promote human rights, including freedom of religion or belief; awareness programs; national reconciliation efforts; education programs to limit religious extremism; and human rights training and monitoring programs by the UN Office of the High Commissioner for Human Rights.xaqiijiso in xuquuda xorriyada diinta iyo xuquuqal insaan kale lagaga hadlo Soomaaliya, taas oo ay ka mid tahay maalgalinta ururada bulshada maxaliga ah ee ka shaqeeya xuquuqal iinsaanka, oo ay ka mid tahay xorriyada diinta iyo caqiidada; barnaamijyadda wacyigalinta; dedaalka heer qaran ee dib u heshiis-siinta; barnaamijyada waxbarashada si loo yareeyo xagjirnimada diinta; tababarada iyo barnaamijyada kormeerka Xafiiska QM u qaabilsan Xuquuqal Iinsaanka.